



Jamhuuriyadda Soomaalilaan
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Cashuuraha Berriga

Republic of Somaliland
Ministry of Finance Development
Inland Revenue Department



FOOMKA DIIDMADA QIIMAYNTA CASHUURTA

Tilmaamo: Si loo xaqiijiyo kalsoonida/is-aaminaadda loona hormariyo kalsoonida uu k u qabo cashuur-bixiyuhu, cashuur-bixiyaha aan ku qancin ogaysiiska qiimaynta ay gaadhsiisay Waaxda Cashuuraha Berrigu, waxa uu xaq u leeyahay in uu diido qiimayntaas si waafaqsan qodobada 7aad faqradiisa 2aad iyo 137aad faqrada 6aad xarafka (d) ee Xeerka Dakhliga Xeer Lr. 72/2016).

QAYBTA A: FAAHFAAHINTA CASHUUR-BIXIYAHA

A1. magaca cashuur-bixiyaha oo buuxa			
A2. Magaca ganacsiga(haddii uu ka duwan yahay magaca cashuur-bixiyaha)			A3 lambarka aqoonsiga cashuurta(TIN)
A4 Ciwaanka (Degmada)	A5. Tuulada		
A6. Lambarka telfoonka cashuur-bixiyaha	A7. E-Ciwaanka emailka		

QAYBTA B: FAAHFAAHINTA QIIMAYNTA

NO	Nooca qiimaynta	Taariikhda la sameeyey	Lacagta qiimaynta
B1.	Ogaysiiska qiimaynta hantidhawrka <input type="checkbox"/>		
B2.	Ogaysiiska qiimaynta cashuur-bixin la'aanta (Had aad xisaab celin la xarayn) <input type="checkbox"/>		
B3	Qiimaynaha kale haddii ay jirraan <input type="checkbox"/>		

QAYBTA C: ASAASKA SHARCI EE DIIDMADA

No	Sababaha diidmada	Lacagta lagu muransan yahay	Lacagta aan lagu muran sanayn
C1.			
C2	Lacagta hormarinta loo bixiyay (ka badan 30% lacagta la qiimeeyay ama 100% lacagta aan lagu muran sanayn)		

Qaybta D Caddaynta ay sameeyaan cashuur-bixiyeyaasha ama wakiiladoodu

D1. Magaca oo buuxa	D2. Xilka					
D3. Saxeexa iyo shaabada	D4. Taar					
D5. Lifaafa la gudbiyay	Foomka qiimaynta <input type="checkbox"/> Nuqulka	D6. Lambarka Juwanka guud ee lacagta hormarinta loo bixiyay				

Qaybta E: Isticmaalka Rasmiga ah – Maamulka cashuurta

E1. Xarunta cashuurta	E2. Taar				
E3. Magaca buuxa ee Sarkaalka Cabashada Cashuurta	Saxeexa				

Hageyaasha buuxbuuxinta foomka diidmada qiimaynta ee February 2020

Qaybta A: Faahfaahinta cashuur-bixiyaha

A1- Magaca cashuur-bixiyaha oo buuxa: Gali magacaaga oo u qoran sida uu ugu qoran yahay shahaadada diwaangalinta cashuur-bixiyaha ama midka hadda haddii aad bedeshay.

A2- magaca ganacsiga: Gali khaanadan magacaaga ganacsiga oo u qoran sidii aad sheegtay markii aad cashuurta diwaangalinaysay ama magaca ganacsiga ee hadda haddii uu ka duwan yahay magaca diwaangashan.

A3- Lambarka Aqoonsiga Cashuur-bixiyaha: Gali khaanadan lambarka aqoonsiga cashuur-bixiyaha.

A4- Ciwaanka – Gali khaanadan ciwaankaaga aad sheegtay markii diwaangalinta cashuurta ama midka hadda hadii aad bedeshay.

A5- Tuulada: Gali khaanadan magaca tuulada aad degan tahay ee aad sheegtay markii aad diwaangalinaysay cashuurta.

A6-Lambarka telfoonka cashuur-bixiyaha: Gali khaanadan lambarkaaga telfoonkaga ee hadda.

A7-Ciwaanka Emailka cashuur-bixiyaha: Gali khaanadan ciwaanka emailkaaga hadda.ss

Qaybta B: Faahfaahinta qiimaynta

B1- Qiimaynta hantidhawrka: Hubi khaanadan, sheeg taariikhda iyo lacagta haddii diidmadaadu lid ku tahay qiimaynta hantidhawrka.

B2- Ogaysiiska qiimaynta cashuur-bixin la'aanta: Hubi khaanadan, sheeg taariikhda iyo lacagta haddii diidmadaadu lid ku tahay qiimaynta lacag bixin la'aaneed. Ogaw: Qiimaynta lacag bixin la'aanta si dedeg deg ah ayaa loo burinayaa haddii aad xarayso foomka xisaab celinta cashuurta ee muddada qiimaynta cashuur bixin la'aanta loo soo saaray – Tani adiga iyo Waaxda Cashuuraha Berriguba waxa aad kaga baaqsanaysaan socodsiinta diidmadaas.

B3: Qiimaynta kale haddii ay jiraan: Hubi khaanadan, sheeg taariikhda iyo lacagta haddii diidmadaadu lid ku tahay wax qiimaynta ah oo kale.

Qaybta C: Asaaska sharci ee diidmada

C1-Sababaha diidmada: Gali khaanadan sababaha diidmada, lacagaha lagu muransanyahay iyo kuwa aan lagu muransanayn.

C2- lacagta hormariska loo bixiyay: Gali khaanadan lacagta loo baahan yahay in la bixiyo inta go'aan kama danbeys ah laga gaadhayo diidmada, oo noqonaya mid ka badan 30% lacagta la qiimeeyay ama 100% lacagta aan lagu muransanayn(Qodobka 7aad faqradiisa 2aad ee Xeerka Dakhliga 2016.

Tusaale: Ka soo qaad lacagta cashuur-bixiyaha ee la qiimeeyay in ay tahay = \$ 60,000 laakiin cashuur-bixiyuhu aanu ogolayn qiimaynta aaminsan yahayna in ay tahay \$40,000 halka ay \$60,000 ka tahay.

Tan macnaheedu waxa weeyaan in 30% lacagta 60,000 ahi tahay \$ 18000 dollars iyo in lacagta aan laysku khilaafsanayn tahay 40,000 oo doolar.

Cashuur-bixiyuhu waxa uu bixin doonaa \$ 40,000 taas oo ka badan \$ 18,000 (30%)

Qaybta D: Caddaynta ay bixiyaan cashuur-bixiyeyaasha ama wakiiladoodu

D1- Magaca oo buuxa: Gali khaanadan magaca qofka diidmada samaynaya.

D2- Xilka: Gali khaanadan xilka qofka diyaariyay foomka diidmada.

D3- Saxeexa iyo shaabada: Saxeex khaanadan. Kana shaabadee meesha ku haboon.

D4- Taariikhda: Gali khaanadan foomka la saxeexay.

D5- Lifaaqa: Calaamadi khaanada qoraalka haddii aad gudbisay nuqulka qiimaynta iyo nuqulka juwanka guud.

D6- Lambarka juwanka guud: Gali khaanadan lambarka juwanka guud ee lacagta hormariska ah ee aad bixisay.

Qaybta E: Isticmaalka rasmiga ah – Maamulka cashuurta

E1-Xarunta cashuurta: Gali khaanadan xarunta cashuurta ee maamulaysa arrimaha cashuurta ee cashuur-bixiyaha.

E2-Taariikhda: Gali khaanadan taariikhda foomkan lagu xareeyay Waaxda Cashuuraha Berriga.

E3-Magaca iyo Saxeexa Sarkaalka Cabashada: Gali khaanadan magaca sarkaalka cabashada cashuurta.